



## **Waa maxay Xarunta Wakaalladaha Badan ee Soo Kabashada (Multi-Agency Recovery Center)?**

Xarunta Wakaalladaha Badan ee Soo Kabashada (**MARC**) waa goobta keliya ee "adeegyada halka meel ah" oo ururada dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ay iskugu yimaadaan si ay caawimo ugu bixiyaan inta lagu jiro masiibada.

### **Adeegyada MARC waxaa kamid ah:**

- Goob noqonaysa meel ay iskugu yimaadaan qoysaska, saaxiibada, iyo xubnaha bulshada  
Qaybinta sahayda faraha badan
- Caawimo ah dhanka helitaanka guryo ku meel gaar ah
- Xog ku saabsan sida loo helo caawimo, hannaanka kiiska shaqo iyo ugudbinta adeegyada kale
- Daryeelka shucuurta iyo ruuxiyada, iyo sidoo kale adeegyada kale ee caafimaadka iyo dhimirka (ee bulshada iyo sidoo kale shaqaalaha iyo mutadawiciinta MARC)
- Helitaanka interneedka si loogu adeegsado iimeelka, baraha bulshada, iyo adeegyada dib u midaynta qoysaska sida webseedka American Red Cross "Safe and Well", taasoo u sahlaysa dadka saamayntu kasoo gaartay masiibadu inay iska diiwaan gashaan ayna ka ogaysiyyaan ehelkooda xaaladooda iyo goobta ay ku sugar yihiin.

### **MARC-yada waxaa loo sameeyay in:**

- ✓ In lagu dadjiyo kasoo kabashada kadib masiibada
- ✓ Bixinta caawimo hufan, oo waxtar leh oo lagu baxsho hal meel oo ah "goob adeegyada dhan la iskugu geeyay"
- ✓ Yareynta waqtiga iyo masaafada ay safrayaan shaqsiyaadka iyo qoysaska waxyeelladu soo gaadhay si ay caawimo u helaan
- ✓ Kaalmo ah dhanka dib mideyneta qoysaska iyo saaxiibada
- ✓ Suurtagalinta in khayraadka laga isticmaalo inta ugu badan iyo dadajinta awooda ururada ee bixinta adeegyada ayadoo:
  - joojinta baahida loo qabo abuurista xarumaha gaarka ah ee caawimada ee ay samaynayaan ururo badan
  - fudaydinta isku dubaridka iyo xog wadaagista u dhexaysa ururada ka qaybgalaaya
- ✓ Suurtigelinta iskaashi waxtar leh oo lala sameeyo dawlada iyo wakaaladaha aan dawliga ahayn
- ✓ Fududeynta ugudbitaanka soo kabashada mudada dheer ah.